# Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee Soomaaliya: Habraaca iyo Adeegga Guud





Supported by:
International Labour Organization
Better Regional Migration Management
UKaid from the British people

# Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee Soomaaliya: Habraaca iyo Adeegga Guud

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS 2025

Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO) 2026
Daabacadii 1Aad - 2026.

Xigasho ruqsad 4.0 International (CC BY **4.0)**

Shaqadan waxaa lagu daabacay xigashada ruqsadda caalamiga ah ee Creative Commons 4.0 . Faahfaahin dheeraad ah ka eeg: creativecommons.org/licences/by/4.0. Isticmaaluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu dib u isticmaalo, la-wadaago (nuqul ka sameeyo oo dib u qaybiyo), wax ka beddelo (isku daro, beddelo ama ku dhiso shaqada asalka ah), sida ku qeexan ruqsadda. Isticmaaluhu waa inuu si cad u xusaa Ururka Shaqaalaha Adduunka ee ILO inay tahay isha laga soo xigtay agabka, isla markaana muujiyo haddii wax isbeddel ah lagu sameeyay nuxurka asalka ah. Isticmaalka astaanta, magaca ama summadda ILO looma siinayo oggolaansho marka lala xiriirinayo turjumaado, wax-ka-beddel ama shaqooyin kale oo ka farcamay shaqadan.

**Xigasho (Attribution) –** Isticmaaluhu waa inuu caddeeyaa haddii wax isbeddel ah lagu sameeyay shaqadan, isla markaana u xigtaa sidan: ILO, Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee Soomaaliya: Habraaca iyo Adeegga Guud. Geneva: Xafiiska Shaqaalaha Adduunka (International Labour Office), 2026. © ILO.

**Turjumaadaha -** Haddii shaqadan la turjumo, bayaankan soo socda waa in lagu daraa xigashada: *Turjumaadan waxaa laga sameeyay xuquuda daabacaadeed ay leedahay Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO). Turjumaaddan ma aysan diyaarin, ma turxaan-bixin, mana ansixin Hay'ada ILO, sidaa darteedna looma tixgelin karo turjumaad rasmi ah oo ay leedahay hay'ada ILO. Hadaba ILO mas'uul kama aha nuxurka ama saxnaanta turjumaaddan. Mas'uuliyadda buuxda waxay saaran tahay oo keliya qoraaga ama qorayaasha turjumaadda.*

**Wax-ka-beddellada (Adaptations) -** Haddii shaqadan wax laga beddelo ama laga soo saaro Nuqullo wax laga beddelay, bayaankan soo socda waa in lagu daraa xigashada: Nuqulkan wax laga beddelay waxaa laga samayey *xuquuda daabacaadeed ay leedahay Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO). Nuqulkan ma aysan diyaarin, ma turxaan-bixin, mana ansixin Hay'ada ILO, sidaa darteedna looma tixgelin karo nuqul rasmi ah oo ay leedahay hay'ada ILO. Hadaba ILO mas'uul kama aha nuxurka ama saxnaanta nuqulkan. Mas'uuliyadda buuxda waxay saaran tahay oo keliya cida samaysay* wax-ka-bedellida.

**Agabka Dhinacyada Saddexaad –** Ruqsaddan ee Creative Commons ma khusayso agab aan xuquuqdiisa daabacaadeed aysan ILO lahayn ee ku jira daabacaaddan. Haddii agabka loo nisbeeyo dhinac saddexaad, qofka isticmaalaya agabkaas ayaa si gaar ah mas'uul uga ah helitaanka oggolaanshaha xuquuqda daabacaadda ee leh xuquuqdaas, iyo sidoo kale wixii dacwo ah ee ka dhasha ku xadgudubka xuquuqdaas.

Khilaaf kasta oo ka dhasha ruqsaddan oo aan lagu xallin karin wada hadal iyo is-afgarad waxaa loo gudbin doonaa garnaqsi (arbitration) iyadoo la raacayo Xeerarka Garnaqsi ee Guddiga Qaramada Midoobay ee Sharciga Ganacsiga Caalamiga ah (UNCITRAL). Dhammaan dhinacyadu waxay ku qasbanaan doonaan inay u hoggaansamaan go'aanka garnaqsi ee kama dambaysta ah ee laga soo saaro khilaafkaas.

Faahfaahinta xuquuqda iyo ruqsadaha kala xiriir: rights@ilo.org. Faahfaahinta daabacaadaha iyo agabka dijitaalka ah ee ILO ka eeg: www.ilo.org/publns.

ISBN: 9789220436295 (print); 9789220436301 (web PDF)

**Waxaa sidoo kale lagu heli karaa Ingiriis:** ISBN 9789220421598 (print); 9789220421604 (PDF);
DOI https://doi.org/10.54394/EYKK0851

Magacyada, tilmaamaha iyo qeexitaannada loo adeegsaday daabacaadaha iyo keydadka xogta ee ILO, kuwaas oo waafaqsan habraacyada Qaramada Midoobay, iyo qaabka agabka loogu soo bandhigay, macnaheedu ma aha in ILO ay muujinayso aragti ama mowqif ku saabsan xaaladda sharci ee dal, deegaan, dhul ama maamul, ama ku saabsan xuduudihiisa iyo kala xadayntiisa. Faahfaahin dheeraad ah ka eeg: www.ilo.org/disclaimer.

Aragtiyaha iyo fikradaha lagu muujiyay daabacaaddan waa kuwa qorayaasha, mana aha kuwo ay khasab tahay inay ka tarjumayaan aragtiyaha, fikradaha ama siyaasadaha ILO.

Tixraaca magacyada shirkadaha, badeecadaha ganacsi ama hababka shaqo kama turjumanyaan mana muujinayaan in ILO ay taageersan tahay ama ansixisay. Sidoo kale, haddii shirkad, badeecad ama hab shaqo gaar ah aan la xusin, taasi looma fasiran karo inay ILO ka soo horjeeddo ama diidan tahay.

**Waxaa lagu daabacay** [**Soomaaliya**]

# ▶ Tusmada


**Gogol-dhig** ..... 4

**Hordhac** ..... 5

**1. Qeexitaannada Guud** ..... 6

**2. Adeegyada shaqo qorista iyo ka hortagga tahriibka shaqo** ..... 8

Qaybta Koowaad
Adeegyada Shaqo Qorista Iyo Shaqada ..... 8

Qaybta Labaad
Waxbarashada, Tababarka, Iyo Baaritaanka Caafimaadka ..... 10

Qaybta saddexaad
Kharashaadka Shaqo Qorista Iyo Lacagaha La Xiriira ..... 11

Qaybta Afraad
Habraaca Shaqo Qorista ..... 11

Qaybta Shanaad
Guddiga Kormeerka ..... 12

**3. Xaaladaha Shaqada** ..... 14

Qaybta Koowaad
Heshiiska Shaqada ..... 14

Qaybta Labaad
Kormeerka Iyo Fulinta Xeerarka ..... 16

**4. Hay'adaha Iyo Ururada Ku Howlan Shaqo Qorista Dibadda** ..... 18

Qaybta Koowaad
Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ee U Qalma Helista Ruqsad Shaqo Qorista Dibadda ..... 18

Qaybta Labaad
Wajibaadka Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ..... 20

Qaybta Saddexaad
Hawlaha Shaqo Qorista Iyo Habraacyada ..... 21

**5. Xadgudubyada Iyo Cabashooyinka** ..... 24

Qeybta Koowaad
Xadgudubyada ay Galaan Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah iyo Tallaabooyinka Laga Qaadayo ..... 24

**6. Adeegyada khuseeya** ..... 30

Qaybta Koowaad
Damaanad Lacageed iyo Caymiska Shaqaalaha ..... 30

Qaybta Labaad
Gargaarka Shaqaalaha ..... 31

Qaybta Saddexaad
Xalinta Khilaafaadka iyo Soo Celinta Shaqaalaha ..... 31

Qaybta Afraad ..... 32

Xadgudubyada Loo Geysto Shaqaalaha iyo Tallaabooyinka Habboon ..... 32

**7. Qodobo Kala Duwan** ..... 34

# Gogol-dhig

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay u heellan tahay xaqiijinta fursado shaqo oo ammaan ah, caddaalad ku dhisan, isla markaana hufan oo ay helaan dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed, gudaha dalka iyo dibaddiisaba. Iyada oo tirada shaqaalaha Soomaaliyeed ee raadsanaya fursadaha shaqo ee dibadda ah ay kordhayso, waxaa sii xoogeysanaya baahida loo qabo hannaan cad, isla-xisaabtan ku dhisan, kuna salaysan xuquuqda shaqaalaha si loo hago habraacyada shaqo-qorista.

Dukumeentigan cinwaankiisu yahay "Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah ee Soomaaliya: Habraacyada iyo Adeegyada Guud" wuxuu astaan u yahay marxalad muhiim ah oo lagu xoojinayo maamul-wanaagga socdaalka shaqada ee dalka. Waxa uu dejinayaa habraacyo cad, la dhaqan-gelin karo, oo ku saabsan shati-siinta iyo hawl-gelinta Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah (PEAs), iyadoo la hubinayo in adeegyadoodu waafaqsan yihiin shuruucda qaranka iyo heshiisyada caalamiga ah ee shaqada.

Iyadoo lagu dhisayo mabaadii' ka tarjumaya shaqo-qoris caddaalad ku dhisan, shaqo sharaf leh, hufnaan iyo isla-xisaabtan, habraacani wuxuu si nidaamsan u hagayaa hawlaha shirkadaha shaqo-siinta. Waxa uu si cad u qeexayaa heerarka ku saabsan habraacyada qorista shaqaalaha, qandaraasyada shaqada, baaritaanada caafimaadka, kormeerka iyo baadhista, qaabilaadda cabashooyinka, celinta shaqaalaha (repatriation), iyo tallaabooyinka ciqaabta. Sidoo kale, waxa uu soo bandhigayaa habab hay'adeed oo muhiim ah sida doorka kormeer ee la xoojiyey ee Kormeerayaasha Shaqada, dhismaha Guddiga Kormeerka, iyo shaqooyinka taageerada sida Ku-xigeennada Shaqada (Labour Attachés).

Diyaarinta Habraacyadan iyo Adeegyada Guud waxa ay ku timid hannaan talo-wadag ah oo ay ka qayb qaateen hay'adaha dawladda, wakiillada qaybta gaarka ah, ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha, bulshada rayidka ah, iyo saaxiibbada caalamiga ah. Dukumeentigani wuxuu ka tarjumayaa hab-raacyada ugu wanaagsan caalamka, gaar ahaan tusaalooyinka ka imanaya Axdiyada Hay'adda Shaqaalaha Adduunka (ILO) iyo Hagista Guud ee Shaqo-Qorista Caddaaladda ah, isagoo si buuxda ula jaan-qaadaya duruufaha iyo mudnaanta Soomaaliya.

Hawshan waxa suurto-geliyey taageerada farsamo ee Hay'adda Shaqaalaha Adduunka (ILO), iyada oo loo marayo wajiga labaad ee Barnaamijka Maareynta Wanaagsan ee Socdaalka Goboleed (BRMM II), kaas oo maalgelinkiisa bixisay Xafiiska Arrimaha Dibadda, Barwaaqo-sooranka iyo Horumarinta Boqortooyada Midowday (FCDO). Iskaashigooda joogtada ahi wuxuu door weyn ka qaatay horumarinta ajandaha dib-u-habaynta socdaalka shaqada ee Soomaaliya iyo waafajinta nidaamka dalkeenna la jaanqaadka qaab-dhismeedyada goboleed ee IGAD.

Wasaaraddu, iyadoo ku shaqaynaysa hagidda Agaasimaha Guud Mudane Yuusuf Xasan Isaaq, waxay si hufan u soo bandhigaysaa habraacan muhiimka ah, kaas oo ah tallaabo weyn oo lagu xoojinayo kalsoonida dadweynaha, hagaajinta nidaamka shaqo-qorista, iyo ballaarinta waddooyinka shaqo sharci ah oo ammaan ah oo ay heli karaan shaqaalaha Soomaaliyeed. Waxa uu sidoo kale dhammaystir u yahay dadaallada qaran ee socda, oo ay ka mid tahay dhaqangelinta Siyaasadda Qaran ee Socdaalka Shaqada, isaga oo adkaynaya ballan-qaadka Dawladda ee ilaalinta xuquuqda, badbaadada, iyo daryeelka dhammaan shaqaalaha Soomaaliyeed, gudaha iyo dibaddaba.

**Prof. Salim Alio Ibro**
Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
March, 2026

# Hordhac

- Iyadoo la ogsoon yahay heerka baahida shaqo la, aaneed ee Soomaalida shaqo doonka ah, dowladdu waa in ay dejisaa nidaam habeysan si loo fududeeyo helitaanka fursadahaas wax ku ool ah.
- Nidaamkani wuxuu yareynayaa shaqo la'aanta gudaha, wuxuu ilaalinayaa xuquuqda, ammaanka, iyo sharafka shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda ka shaqeynaya, wuxuuna gacan ka geysanayaa horumarinta xirfadooda iyo aqoontooda.
- Dib u soo nooleynta heshiisyadii laba geesoodka ahaa ee u dhaxeeyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalalka shaqaalaha ka qaata ayaa muhiim u ah xoojinta hannaanka shaqo qorista ee dibadda iyo ka hortagga qulqulka shaqaalaha Soomaaliyeed ee aan sharciyeysneyn.
- Shirkada Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah waxay door muhiim ah ka qaataan, fududeynta suuqa shaqada, dhiirrigelinta nidaamka rasmiga ah, iyo yareynta khatarta tahriibka shaqaalaha. nidaamka saxda ah, dhaqangelinta, iyo kormeerka joogtada ah ee hay'adahan ayaa muhiim u ah fulinta nidaamka shaqo raadinta iyadoo la raacayo "Mabaadi'da Guud iyo Tilmaamaha Howleed ee Qorista Saxda ah" iyo "Qeexidda Lacagaha Qorista iyo Kharashaadka La Xiriira."
- Dowladda Soomaaliyeed waa in ay kormeerto, hagto, qiimeyso, oo nidaamiso adeegyadan shaqo ee Hay'adaha gaarka ah si ay u sugaan xuquuqda iyo ammaanka shaqaalaha Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibadda, iyo shaqaalaha ajaanibta ah ee dalka ka shaqeynaya.

Habraaca iyo adeegyada guud ee Hay'adaha Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah wuxuu ka kooban yahay toddobo cutub:

**Cutubka Koowaad: Qeexitaannada Guud**

- Qeexida eray bixinta, sharciga khuseeya, iyo ereyada muhiimka ah ee lagu adeegsado dukumintigan.

**Cutubka Labaad:** Adeegyada Shirkadaha Shaqosiinta iyo Ka hortagga Tahriibka Shaqaalaha

- Hawlaha qorista, mas'uuliyadaha Hay'adaha Shirkadaha Shaqosiinta, diyaarinta warbixinaha, qiimeynta xirfadaha shaqaalaha, barnaamijyada wacyigelinta, baaritaanka caafimaadka, khidmadaha adeegyada, iyo nidaamyada maamulka ee lagu maareynayo shaqo raadinta gudaha iyo dibadda.

**Cutubka Saddexaad:** Xaaladaha Shaqo, Heshiisyada Shaqada, iyo Go'aannada La Xiriira

- Xaaladaha shaqo, tusaalayaasha heshiisyada shaqo, adeegyada shaqaalaha, xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha, iyo awoodda go'aan gaarista.

**Cutubka Afraad:** Shuruudaha iyo Habraacyada Ruqsadaha

- Shuruudaha lagu helo iyo dib u cusbooneysiinta ruqsadaha Hay'adaha Shirkadaha Shaqosiinta, diiwaangelinta, muddada shaqada ruqsadaha, waajibaadka qasabka ah ee Hay'adaha Shirkadaha Shaqosiinta, iyo habraaca diyaarinta shaqaalaha ka tagaya dalka.

**Cutubka Shanaad:** Xadgudubyada, Ganaaxyada, iyo Qaabka Cabashooyinka

- Noocyada xadgudubyada, tallaabooyinka maamul ee laga qaadayo hay'adaha xadgudbaya, habka cabashooyinka, iyo fulinta go'aannada xukunka.

**Cutubka Lixaad:** Damaanad Maaliyadeed, Caymis, iyo Kormeerka Shaqaalaha

- Damaanad maaliyadeed, caymiska shaqaalaha, la socodka waxtarka shaqaalaha, xallinta khilaafaadka, soo celinta shaqaalaha, iyo cawaaqibka sharciyeynta haddii ay jiraan xadgudubyo ay sameeyaan shaqaale ama loo shaqeeyayaal.

**Cutubka Todobaad:** Go'aaminta Shirkadaha Shaqosiinta iyo Xallinta Khilaafaadka

- Qaabka loo go'aaminayo hay'adaha Shirkadaha Shaqosiinta, muddada xallinta murannada shaqo, iyo awoodaha sharciyeed ee xallinta arrimaha la xiriira Shirkadaha Shaqosiinta.

Cutubyadan waxay dhisayaan hannaan adag oo lagu hagayo, la maamulayo, lana damaanad qaadayo adeegyada shaqo ee ay bixiyaan Hay'adaha Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah, iyagoo xaqiijinaya xuquuqda iyo badqabka shaqaalaha Soomaaliyeed gudaha iyo dibadda.

# 1

# Qeexitaannada Guud

## 1. Ujeeddada Habraacan iyo Qeexitaannada soo socda ayaa lagu dabaqi doonaa: Magaca, Baaxadda habraaca, iyo Adeegyada Guud:

- Magaca: Habraacan waxaa loo yaqaannaa *"Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee Soomaaliya: Habraacyada iyo Adeegyada Guud."*
- Baaxadda Habraaca: Habraacan iyo adeegyadiisa shaqo wuxuu khuseeyaa dhammaan shaqo doonayaasha ka faa'iideysanaya adeegyada  Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah (SHIRKADAHA SHAQOSIINTA GAARKA ).
- Ujeedada Habraacan: Habraacan waxa uu fududeynayaa shaqo helista muwaadiniinta Soomaaliyeed oo raba shaqooyinka dibadda iyo kuwa gudaha Soomaaliya, isagoo ka fogaanaya takoor iyo faquuq ku saleysan Jinsi, midab, qabiil, qowmiyad, asalka dhalasho, heer laxaad, xaalada caafimaad (oo ay ku jirto HIV/AIDS), xiriir qoys, dhalasho ama uur, da', diinta, aragtida siyaasadeed, ama xubinimada urur shaqaale, Shaqo helista waa in lagu saleeyaa karti, xirfad, khibrad, iyo waxqabad.
- Habraacan waxa uu soo jeedinayaa arrimahan soo socda:
    - Abuurista iyo dhiirrigelinta shirkado/hay'ado maxalli ah oo si cadaalad iyo hufnaan ah u sahli kara shaqo raadinta muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo shaqaalaha ajaanibta ah.
    - Magacaabista *Wakiillada Shaqada Dibadda* (Labour Attachés) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) la leedahay Heshiisyada Laba Geesoodka ah ee Shaqada (Bilateral Labour Agreements).
    - Mamnuucidda Shirkadaha Shaqosiinta dadka ka yar 18 sano ee dooneysa shaqo dibadda.

- Dhisidda *Guddiga Korjoogteynta* oo ka kooban xubnaha Golaha Wasiirada ee si toos ah ama si dadban uga shaqeeya arrimaha shaqo raadinta, gaar ahaan shaqooyinka dibadda. Ururrada shaqaalaha iyo loo shaqeeyayaasha ee ugu matalaadda badan waa in ay xubno buuxa ka noqdaan Guddiga. Wakiil ka socda ururka ugu weyn ee  Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah (SHIRKADAHA SHAQOSIINTA GAARKA ) waxa uu xubin  rasmi ah ka noqdaan guddiga.

## 2. Qeexitaannada:

- Haddii aan si kale loo qeexin qoraalka, ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha lagu qeexay halkan:
  - **Shirkad Shaqosiinta Gaarka (Private Recruitment Agency):** Waxaa loola jeedaa shirkad gaar ah oo shaqaale u diyaarineysa shaqooyinka gudaha iyo dibadda iyada oo raacaysa habraacan iyo adeegyada Shirkadaha Shaqosiinta gaarka .
  - **Xafiiska Shaqada (Authority):** Waxaa loola jeedaa wasaaradda, waaxda ama Hay'adda awoodda u leh bixinta, kormeerka, iyo kala laabashada ruqsadaha, oo ayna  u oggolaato dowladda Federaalka Soomaaliya.
  - **Heshiis Laba Geesood ah oo Shaqada La Xiriira (Bilateral Labour Agreement):** Heshiis u dhexeeya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo waddan kale oo ku saabsan qorista iyo Shirkadaha Shaqosiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed.
  - **Shahaadada Aqoonta Xirfadeed  (Certificate of Professional Competence):** Waa shahaado ay bixiso Hay'ad sharciyeysan oo ay aqoonsan tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya, taas oo xaqiijinaysa in qofka haysta uu leeyahay xirfad gaar ah.
  - **Shaqo Toos ah (Direct Employment):** Waxa loola jeedaa shaqada tooska ah ee u dhaxaysa loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha, iyada oo aanay ku lug lahayn Hay'ad Dawladeed ama mid gaar loo leeyahay.
  - **Shaqaale (Employee):** Qof leh heshiis shaqo oo lala galay loo-shaqeeye, Shirkad ama Hay'ad, iyada oo la raacayo habraacan iyo adeegyada Shirakadaha Shaqosiinta Gaark ah.
  - **Loo Shaqeeye (Employer):** Qof shaqaaleeysiin kara hal ama in ka badan shaqaale.
  - **Qoys (Family):** Waxaa loola jeedaa lammaanaha shaqaalaha, carruurtooda, iyo waalidkood.
  - **Ruqsad (Licence):** Waa oggolaanshaha la siiyo  Shirkadaha Shaqosiinta si ay u fuliyaan adeegyada shaqo raadinta, oo ay ku jirto shaqooyinka dibadda.
  - **Wasaaradda (Ministry):** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee Soomaaliya.
  - **Safaarad (Mission):** Waxaa loola jeedaa Safaaradaha Soomaaliya, Xafiisyada Joogtada ah, Xafiisyada Qunsuliyada, Xafiisyada Ganacsiga, xafiisyada wakiillada shaqada ee Dibadda.
  - **Shil Shaqo (Occupational Incident or Accident):** Waxaa macnihiisa lagu qeexayaa Xeerka Shaqada Soomaaliya (Somali Labour Code) ama sharciga shaqada ee dalka uu shaqaaluhu ku sugan yahay, haddii aanu ahayn Soomaaliya.

# 2

# Adeegyada shaqo qorista iyo ka hortagga tahriibka shaqo

## Qaybta Koowaad
## Adeegyada Shaqo Qorista Iyo Shaqada

### 3. Shaqo Qorista:

- Xafiiska Shaqada  wuxuu fududeyn doonaa adeegyada shaqo ee dibadda isaga oo la shaqeynaya Hay'adaha wadamada shaqaalaha qaadanaya, iyada oo la raacayo Heshiiska Shaqo ee Laba Geesoodka ah (BLA) ee u dhexeeya Dowladaha.
- Xafiiska Shaqada wuxuu la shaqeyn doonaa Hay'adaha kale ee Dowladda marka ay lagama maarmaan noqoto in si toos ah loo wada shaqeeyo si loo fududeeyo shaqo qorista dibadda.

### 4. Noocyada Adeegyada:

- Waajibaadka Xafiiska Sahqada , sida ku cad habraacan iyo adeegyada guud ee Shirakadaha Shaqo Qorista Gaarka ah (Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ), waxaa ka mid ah la socodka howlaha  shirkada Shaqo Qorista  Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka  sida xulista, fududeynta baaritaanka caafimaadka, shaqo qorista, barnaamijyada hordhaca ah ee ka hor inta aan loo dhoofin, fududeynta safarka shaqaalaha la doortay, iyo adeegyada kale ee la xiriira shaqo sugan oo caddaalad ah.

## 5. Mamnuucidda Shaqo Qorista Sharci-darrada ah:

- Shaqo qorista tooska ah oo aan la marin Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee ruqsada leh waa mamnuuc.
- Ma jiri karto shirkado Shaqosiinta oo shaqaale qori kara iyada oo aan Xafiiska siinin ruqsad sax ah.
- Kaliya Xafiiska shaqada ayaa ogolaan kara shaqo qorista tooska ah ee dibadda marka la buuxiyo shuruudaha soo socda:
  - Haddii shaqo-bixiyaha uu yahay safaaradda Soomaaliya ee dibadda.
  - Haddii shaqo-bixiyaha uu yahay Hay’ad Caalami ah.
  - Haddii qof shaqo raadiye uu shaqo si gaar ah u helo.
- Kaliya Xafiiska shaqada ayaa ogolaan kara xayaysiinta iyo shaacinta shaqooyinka ay Dawladaha kale si toos ah u dalbanayaan.

## 6. Waajibaadka Muhiimka ah ee Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee la xiriira Shaqooyinka Dibadda:

- Dhammaan dhinacyada ku lug leh shaqo qorista muwaadiniinta Soomaaliyeed ee dibadda waa in ay raacaan sharciga shaqada ee waddanka loo shaqo tegayo, habraacan, iyo adeegyada guud ee Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah .
- Heshiisyada shaqo ee u dhexeeya shaqaalaha iyo shaqo-bixiyeyaasha waa in ay waafaqsanaadaan shuruucda shaqada ee Soomaaliya ama kuwa dalka loo shaqo tegayo.
- Habraacan iyo adeegyada guud ee shirkada Shaqosiinta gaarka waxay soo dhoweynayaan xuquuq dheeri ah oo shaqaalaha la siiyo oo aan lagu xusin xeerarka shaqada ee khuseeya.

### 7. Waajibaadka Warbixineed:

- Shirkada Shaqosiinta gaarka oo   kasta waa in ay diyaariyaan warbixino faahfaahsan oo xilliyo cayiman laga rabo, kuna saabsan xaaladda shaqo qorista dibadda iyo shaqaalaha la geeyay wadamada loo diray.
- Xafiiska Shaqada wuxuu dejin doonaa qaabka iyo jadwalka warbixinta la gudbinayo.
- Xafiiska Sahqada wuxuu isugu geyn doonaa xogta wuxuuna la wadaagi doonaa Hay'adaha khuseeya siyaasadaha guud ee bulshada iyo dhaqaalaha dalka.

## Qaybta Labaad
## Waxbarashada, Tababarka, Iyo Baaritaanka Caafimaadka

### 8. Heerarka Waxbarasho iyo Qiimaynta Xirfadda ama Aqoonta Farsamo:

- Shaqaalaha doonaya shaqo dibadda waa in uu :
  - Qofka  akhrin karaa  Af - Soomaaliga iyadoo afafka kale la tixgelinayo.
  - Haysta ugu yaraan  shahaado caddeyneysa xirfadahooda ama aqoontooda farsamo, shahaadadaasoo ay bixisay xarun tababar oo ay aqoonsan tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya .
  - Shaqaalaha haysta shahaadooyin jaamacadeed waa in ay shahaadooyinkooda ka xaqiijiyaan Wasaaradda Waxbarashada  iyo Tacliinta Sare iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
  - Buuxiyaan shuruudaha kale ee uu codsado loo shaqeeyaha

### 9. Diyaarinta Barnaamijka Hagidda iyo Wacyigelinta:

- Xafiisku  shaqada waa in uu xaqiijiyo in:
  - Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah   ay bixiyaan barnaamijyo hordhac iyo wacyigelin ah oo ay helaan shaqaalaha loo dirayo shaqooyinka dibadda, kuwaas oo ay ku jiraan faahfaahinta shaqada, xuquuqda, iyo waajibaadka shaqaalaha.
  - Shirkadaha Shaqosiinta gaarka  ay shaqaalaha dalka gudihiisa ka shaqeynaya siiyaan macluumaad ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka ay leeyihiin, oo ay ku jiraan xuquuqaha aasaasiga ah ee uu farayo Xeerka Shaqada Soomaaliya.
  - Ololayaal xog-bixineed oo joogto ah la sameeyo si shaqaalaha looga wacyigeliyo xaaladaha shaqada dibadda, faa'iidooyinka iyo caqabadaha laga yaabo in ay la kulmaan.
  - Wacyigelin iyo hagis la siiyo maamulka Shirkadaha Shaqosiinta gaarka, gaar ahaan kuwa ku howlan shaqo qorista dibadda.
  - Xafiisku shaqada  kobciyo dadaallada wacyigelinta iyo hagitaanka si loo soo jiito danaha shaqo-bixiyeyaasha (loo-shaqeeyayaal) shisheeye, diiraddana lagu saaro shuruudaha shaqada, adeegyada, habraacyada, heerarka, iyo heerarka shaqo ee muwaadiniinta Soomaaliyeed.

### 10. Baaritaanka Caafimaadka:

- Baaritaanka caafimaad ee shaqaalaha  waxaa qaban doona xarun caafimaad oo si wadajir ah ay u doortay  Xafiiska shaqada iyo  Shirkada Shaqosiinta gaarka oo fududaynaysa meelaynta shaqada. Shaqaalaha Soomaaliyeed helaya  shaqo gudaha dalka waxa laga dhaafayaa baaritaanka caafimaadka haddii aysan shuruucda kale ku waajibin, iyada oo loo eegayo nooca shaqada.

- Shirkada Shaqosiinta gaarka fududeynaysa shaqo qorista dibadda waxay shaqaalaha u diri doontaa baaritaan caafimaad kaddib marka uu shaqaaluhu buuxiyo dhammaan shuruudaha la cayimay.
- Haddii shaqaaluhu u baahdo in uu maro baaritaan caafimaad oo dheeraad ah, kharashka dheeraadka ah waxaa dabooli doona Shirkada Shaqosiinta Gaarka ah .

# Qaybta saddexaad
# Kharashaadka Shaqo Qorista Iyo Lacagaha La Xiriira

## 11. Kharashaadka Shaqo-bixiyaha Daboolayo:

- Shaqo-bixiyaha (loo shaqeeyaha) waa in uu daboolo kharashaadka soo socda:
    - Kharashka fiisaha dalka loo shaqo tegayo.
    - Kharashka tikitka safarka (tikitka soo laabashada).
    - Kharashka ogolaanshaha shaqada (Work Permit).
    - Kharashka ogolaanshaha deganaanshaha (Resident Permit).
    - Kharashka xaqiijinta dukumeentiyada (Document Authentication).

## 12. Kharashaadka Shaqaalaha Daboolayo:

- Shaqaalaha waa in uu bixiyo kharashaadka soo socda:
    - Kharashka bixinta baasaboorka.
    - Kharashka warqada caddeynta dambi la'aanta (Criminal Clearance).
    - Kharashka baaritaanka caafimaadka hore.
    - Kharashka tallaalka.
    - Kharashka bixinta shahaadada dhalashada.
    - Kharashaadka kale ee la xiriira shahaadooyinka xirfadeed iyo tacliimeed.

## 13. Khidmadda Adeegga Wasaaradda

- Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ah waa inay bixisaa khidmad adeeg oo ay Wasaaradda ku ansixiso kuna caddeyso heshiisyada shaqo haddii loo baahdo, ha ahaadeen kuwa la xiriira shaqaalaha Soomaaliyeed ama ajnabiga.

# Qaybta Afraad
# Habraaca Shaqo Qorista

## 14. Hannaanka Guud ee Shaqo Qorista iyo Adeegga

- Habraaca guud iyo adeegga ee Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah waa in si rasmi ah loogu caddeeyo Heshiiska Shaqo ee Laba Geesoodka ah (BLA) haddii uu jiro heshiis dhex mara Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya iyo waddanka shaqaalaha qaadanaya.

## 15. Habraaca Maamulka ee Faahfaahsan

- Xafiiska wuxuu soo saari doonaa habraac maamul oo faahfaahsan, oo qeexaya waajibaadka iyo mas'uuliyadda Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ee ku saabsan shaqo qorista dibadda iyo gudaha dalka.

## 16. Magacaabista Ku-qeybsanaha Shaqaalaha (Labour Attaché)

- Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay u magacaabi doontaa ku-qeysanaha Shaqada (Labour Attaché) oo ka tirsan safaaradda Soomaaliya ee waddanka shaqaalaha loo dirayo, si loo hubiyo ilaalinta xuquuqda, badqabka, iyo sharafta shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda.
- Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxay fududeyn doontaa dhammeystirka geedi-socodka magacaabista Ku-qeysanaha Shaqada ee safaaradaha Soomaaliya.
- Waajibaadka Ku-qeybsanaha Shaqada waxaa faahfaahin doona Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
- Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka waa in ay xiriir dhow la yeeshaan Ku-qeybsanaha Shaqada ee dalalka ay shaqaalaha u dirayaan.

# Qaybta Shanaad
# Guddiga Kormeerka

## 17. Guddiyada Kormeera Hawlaha Shaqo Qorista ee Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka

- Guddi kormeer ah, oo ka kooban Wasaaradaha iyo ururrada shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, waa in la dhisaa si ay isugu dubbaridaan la socodka hawlaha Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka, iyadoo ujeedadu tahay in la ilaaliyo xuquuqda iyo sharafta shaqaalaha Soomaalida iyo kuwa ajnabiga ah, loogana hortago socdaalka joogtada ah.

## 18. Mas'uuliyadda Guddiga Kormeerka

- Guddiga Kormeerka wuxuu ka koobnaan doonaa:
  - Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (Guddoomiyaha)
  - Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah (Guddoomiye ku-xigeen)
  - Wasiirka Maaliyadda (Xubin)
  - Wasiirka Amniga (Xubin)
  - Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare (Xubin)
  - Qareen ka socda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (Xubin)
  - Wakiil ka socda ururada loo shaqeeyaha ee ugu matalaadda badan (Xubin)
  - Wakiil ka socda ururka shaqaalaha ee ugu matalaadda badan (Xubin)
  - Wakiil ka socda ururka Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ee ugu matalaadda badan (Xubin talo-bixin leh)

- Xoghaynta Guddiga Kormeerka waxaa la siiyay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (Agaasinka Arrimaha Sharciga iyo Xiriirka Shaqada). Awoodaha iyo waajibaadka Guddiga waxaa ka mid ah:
  - Hubinta hirgelinta saxda ah ee qodobbada kala duwan ee nidaamka shaqo-qorista Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah, kuwaas oo khuseeya shaqooyinka gudaha iyo dibadda ee ay helayaan shaqaalaha Soomaaliyeed iyo ajnabiga.
  - Kormeerka diyaarinta Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka, oo ay ku jirto tababarka shaqaalaha loo diyaarinayo shaqooyinka dibadda.
  - Daraasado ku saabsan samaynta Heshiisyo Shaqo oo Laba Geesood ah (BLA), gaar ahaan dalalka doonaya shaqaalaha Soomaaliyeed, si loo kordhiyo fursadaha shaqo ee dibadda iyo kuwa ajnabiga ah ee raba shaqo gudaha Soomaaliya.
  - Xoojinta iskaashiga ka dhexeeya Xafiiska iyo Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka si looga hortago xadgudubyada iyo falalka sharci-darrada ah ee wax u dhimaya xuquuqda, sharafta, iyo ammaanka shaqaalaha.
  - Dhiirrigelinta fursadaha shaqooyinka dibadda si loo yareeyo tahriibka shaqo ee sharci-darrada ah.
  - Abaabulidda ololayaal wacyigelineed si loo joojiyo shaqo qorista sharci-darrada ah.
  - Fududeynta iyo abaabulidda xarun casri ah oo lagu kaydiyo xogta iyo macluumaadka ku saabsan shaqo qorista dibadda iyo suuqyada shaqo ee Soomaaliya.
  - Maareynta ama xallinta cabashooyinka ay soo gudbiyaan shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaasha ka faa’iideysanaya adeegyada Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah
  - Maareynta cabashooyinka ka imaanaya Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee la saaray ciqaab, sababo la xiriira anshax-xumo ama jebinta xeerarka lagu maamulo hawlahooda

# 3

# Xaaladaha Shaqada

## Qaybta Koowaad
## Heshiiska Shaqada

### 17. Xaaladaha Shaqada:

- Xafiisku wuxuu soo saari doonaa amarro rasmi ah oo la xiriira xaaladaha shaqada ee suuqyada shaqada iyo arrimaha bulsho, iyada oo loo eegayo Xeerka Shaqada Soomaaliyeed.

### 18. Qaab-dhismeedka Heshiiska Shaqada ee Heerka Caadiga ah:

Xafiisku wuxuu diyaarin doonaa *Heshiiska Shaqada ee Heerka Caadiga ah (Standard Employment Contract)*, kaas oo Shirkada Shaqosiinta gaarka  ay khasab ku tahay inay adeegsadaan, Nooc kasta oo kale oo heshiis shaqo ah looma aqoonsan doono mid ansax, qodobada aasaasiga ah ee lagu dari doono waxaa ka mid ah:

- Taariikhda bilawga shaqada iyo muddada shaqaalaynta
- Saacadaha shaqada iyo jadwalka shaqo.
- Mushaharka ugu yar ee waddanka shaqo-bixiyaha.
- Fasaxyada shaqaalaha xaqa u leeyahay.
- Kharashaadka safarka iyo adeegyada isgaarsiinta.
- Caymiska caafimaadka, nolosha, iyo badqabka

- Hoyga, cuntada, iyo adeegyada kale ee daryeelka (haddii shaqo-bixiyaha bixiyo).
- Xuquuqda shaqaalaha, badqabkooda, iyo caafimaadkooda.
- Magaca iyo faahfaahinta xiriidhka ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha
- Nooca shaqada iyo goobta shaqada lagu fulinayo,
- Qaybta xirfadeed ee shaqada uu shaqaaluhu ka tirsan yahay.
- Mushaharka shaqada caadiga ah, saacadaha dheeraadka ah, shaqada habeennimo, iyo maalmaha fasaxa ah, iyo habka mushaharka loo bixiyo
- Gunnooyinka, magdhawga, iyo lacagaha dheeraadka ah (haddii ay jiraan)
- Xaaladaha iyo xaddiga uu loo-shaqeeyuhu oggol yahay in uu dhimo mushaharka.
- Xaaladaha sharciga u ogolaanayo shaqaalaha inuu galo waddanka iyo uu ku noolaado muddada shaqada
- Shuruudaha gelitaanka iyo degenaanshaha waddanka shaqada loo tagayo.
- Habka lagu daboolayo kharashyada safarka ee shaqaalaha iyo xubnaha qoyskiisa
- Haddii shaqadu tahay mid ku meel gaar ah, qaabka loo dabooli doono kharashaadka dib-u-noqoshada dalka hooyo ama waddanka shaqada (sida habboon).
- Xaaladaha lagu joojin karo heshiiska shaqada kahor inta uusan dhammaanin

#### 18.1 Diyaarinta Heshiiska Shaqada ee Heerka Caadiga ah

Marka la diyaarinayo qodobada aasaasiga ah ee Heshiiska Shaqada, sida lagu qeexay qodobka 18, waa in la tixgeliyo arrimaha soo socda:

- Dhaqanka, caadooyinka, hab-nololeedka, shuruucda shaqada, iyo arrimaha bulshada ee dalka martida loo yahay, iyadoo la ilaalinayo dhaqanka, diinta, iyo sharafta shaqaalaha Soomaaliyeed.
- Heshiisyada Shaqo ee Laba Geesoodka ah ee u dhexeeya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalalka shaqaalaha loo dirayo, iyo sidoo kale heshiisyada caalamiga ah ee la xiriira ee socdaalka shaqada iyo heerarka shaqada caalamiga ah ee ay dejisay Hey'adda Shaqaalaha Adduunka (ILO).
- Xaaladaha suuqa shaqada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

# Qaybta Labaad
# Kormeerka Iyo Fulinta Xeerarka

## 19. Adeegyada Guud

**19.1** Waa waajib saaran shirkadaha Shaqosiinta gaarka in ay xaqiijiyaan oo hubiyaan in shaqaalaha dibadda u safraya aysan wax dhibaato sharci ah kala dhaxayn Dowladda Soomaaliyeed.

**19.2** Xafiisku wuxuu magacaabi doonaa Kormeere Shaqo (Labour Inspector) si uu si maalinle ah ula socdo hawlaha shirkadaha Shaqosiinta gaarka .

## 20. Helitaanka Nidaam Cabasho oo Waxtar Leh

**20.1** Xafiisku wuxuu dhegeysan doontaa oo go'aan ka gaari doontaa arrimaha maamul ee la xiriira jebinta habraacyadan, haddii ay ku lug leeyihiin loo-shaqeeyayaal, wakiillada Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah, ama shaqaale (sida ku habboon).

**20.2** Xafiisku waa inuu hubiyaa in shaqaalaha socdaalka ah ay si sahlan u helaan hab-raac cabasho oo lacag la'aan ah, degdeg ah, iyo xallin khilaafaad oo waxtar leh, kaas oo ay ka helaan xal cadaalad ah, oo ay ku jiraan magdhaw, iyaga oo aan ka baqaynin in loo adeegsado tallaabooyin aargoosi ah.

**20.3** Xafiisku wuxuu amri karaa in la soo celiyo lacago si sharci-darro ah looga qaaday shaqaalaha Soomaaliyeed.

**20.4** Xafiisku wuxuu dadaal ugu jirtaa xaqiijinta u-hoggaansanaanta shuruudaha ruqsadaha, sida lagu xusay habraacyadan, oo ay ku jirto shaqo-qorista dibadda.

## 21. Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha

- Xafiiska, oo ay wehliyaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda, waxay gacan ka geysan doonaan xaqiijinta xuquuqda, badqabka, iyo sharafta shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda ka shaqeeya.
- Xafiisku wuxuu caawin doonaa shaqaalaha si ay u xalliyaan cabashooyinkooda, u helaan garsoor, iyo cadaalad.
- Xafiisku wuxuu la shaqayn doonaa hay'adaha ku shaqada leh si loo abuuro jawi isku kalsooni iyo dhexgalid ah oo ay wadaagaan dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan kuwa dibadda ka shaqeeya.
- Xafiisku waa in uu siiyo kaalmo sharci iyo talo shaqaalaha ay dhibaato kala kulmaan dibadda inta ay shaqaynayaan taasina ay gacan ka geysato sidii ay u heli lahaayeen caddaalad.

#### 21.1 Awoodaha iyo Waajibaadka Kormeerayaasha Shaqada

Kormeere Shaqo oo Xafiisku magacaabay wuxuu leeyahay awoodahan iyo waajibaadkan:

- Kormeero si uu u xaqiijiyo in Shirkadaha Shaqosiinta gaarka leeyahay xafiis shaqeynaya oo leh qalab iyo agab lagama maarmaan ah.
- Hubinta in shirkadaha Shaqosiinta gaarka uu leeyahay goob ku habboon kulamada shaqaalaha, imtixaanada, iyo wacyigelinta.
- Xaqiijinta in shirkadaha Shaqosiinta gaarka buuxiyo dhammaan shuruudaha kor ku xusan ka hor inta aan ruqsadda la siin ama la cusboonaysiin.
- Hubinta in shirkadaha Shaqosiinta gaarka haysto xafiis casri ah oo lagu kaydiyo xogta shaqaalaha si fudud loo heli karo.
- Xaqiijinta in shirkadaha Shaqosiinta gaarka bixiyo wacyigelin ku saabsan xaaladaha shaqada, xaalada waddanka shaqada, iyo xaalada shaqada ka hor iyo ka dib shaqo qorista.
- Fulinta kormeero dhamaystiran markasta oo suurtagal ah ama marka lagu wargaliyo xadgudubka habraacan.
- Kormeero joogto ah iyo qiimayn guud si looga hortago jebinta xeerarka shaqo qorista.
- Kormeeraha shaqada wuxuu geli karaa xafiisyada shirkadaha Shaqosiinta gaarka wakhti kasta inta lagu jiro saacadaha shaqada si uu u qiimeeyo dukumeentiyada iyo xogta la hayo.
- Kormeeraha Shaqada wuxuu xaq u leeyahay in uu waqti kasta oo saacadaha shaqada ah galo xafiisyada Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah si uu u qiimeeyo diiwaannada iyo dukumentiyada ay hayaan.
- Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee shaqaalaha ka howlgelinaya gudaha Soomaaliya waxaa si joogto ah loogu sameynayaa Kormeerka Shaqada ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), si waafaqsan Xeerka Shaqada ee Soomaaliya.

**21.2 Mas'uuliyadda Kormeerayaasha Shaqada**

**Kormeerayaasha Shaqada waa in ay:**

- Wataan aqoonsi rasmi ah oo ay soo bandhigaan marka loo baahdo inta ay waajibaadkooda gudanayaan.
- Diyaariyaan warbixinno bille ah oo la xiriira kormeerka shaqada.
- Uga warbixinta Madaxda Wasaaradda natiijada ka soo baxday kormeerka shaqada oo ay ku jiraan soo jeedino tallooyin sharci iyo tallaabooyinka lagama maarmaanka ah
- Xafiisku wuxuu bixin doonaa talooyin wax ka beddelaya khaladaadka la ogaaday si loo hagaajiyo habraacyada mustaqbalka.
- Kormeereyaasha Shaqada waa in ay mas'uul ka noqdaan haddii ay si khaldan u adeegsadaan awoodda lagu siiyey habraacan.
- Warbixinaha Kormeerka Shaqada waxaa lala wadaagi doonaa lagana doodi doonaa Guddiga Kormeerka Saddex-geesoodka ah.

# 4

# Hay'adaha Iyo Ururada Ku Howlan Shaqo Qorista Dibadda

## Qaybta Koowaad
## Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ee U Qalma Helista Ruqsad Shaqo Qorista Dibadda

### 22. Shuruudaha U Qalmidda Ruqsada

**22.1** Si ay Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ugu qalanto helista ruqsada  shaqo qorista, oo ay ku jirto shaqo qorista dibadda, waa inay:

- Noqoto shirkad si sharci ah loo aasaasay.
- Haysato shati rasmi ah oo ka timid Wasaaradda Ganacsiga.
- Yeelato magac iyo astaan gaar ah oo aan lala wadaagin hay'ad kale.
- Haysato xafiis rasmi ah iyo cinwaan sharci ah.
- Yeelato xisaab bangi rasmi ah oo ku taalla bangi ganacsi oo la aqoonsan yahay.
- Haysato raasamaal u dhigma **US $25,000** oo lagu hayey bangi muddo saddex bilood ah ama laga bilaabo xilliga diiwaangelinta shirkadda.
- Aann lagu  lahayn wax waajibaad canshuureed oo ka dhan ah Dowladda.
- Yeelato qaab-dhismeed sharci iyo nidaam maamul oo sax ah.

- Hubiso in **51%** saami-hayeyaasha iyo maamulka sare ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed.
- Aan horey loogu diidin shati shaqo qorista ama aan ruqsad horey loogala noqonin.
- Uusan jirin xukun maxkamadeed oo kama dambays ah ama dacwad maxkamadeed oo socota oo ka dhan ah.

**22.2** Masuuliyiinta Dowladda ee fulinaya habraacan looma oggola inay helaan ruqsad shaqo qorista dibadda haddii ay dana toos ah ama dadban ka leeyihiin Xafiiska Shaqada, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Laanta Socdaalka iyo Jinsiyadda, Ciidamada Ammaanka, Qurba-joogta Soomaaliyeed, ama Safaaradaha, oo ay ku jiraan xubnaha qoysaskooda.

**22.3** Hal shati oo kaliya ayaa loo oggol yahay hay'ad kasta oo Shirikad Shaqosiin gaarka ah.

**22.4** Maamulka sare iyo agaasimayaasha Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah waxaa laga mamnuucay inay ka mid noqdaan ama si toos ah ama si dadban dano uga yeeshaan shirkad Shaqosiin kale

## 23. Ansixinta Ruqsad Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ah

Shirkad kasta oo buuxisa shuruudaha ku xusan qodobka (22) ee rabta ruqsad shaqo qorista waa inay:

- Buuxiso foomka codsiga Xafiiska shaqada kuna lifaaqdo dukumentiyada soo socda:
    - Macluumaadka guud ee Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ah (Xog-ururin kooban oo ku saabsan taariikhda, ujeeddooyinka, iyo howlaha shirkadda)
    - Magacyada guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, xubnaha guddiga sare, iyo maamulka Shirkadda Shaqosiinta Gaarka.
- U gudbiso codsiga Xafiiska.
- Bixiso khidmada ruqsad sida ku xusan qodobka 24.1.

## 24. Diiwaangelinta Shirkadda Shaqosiinta Gaarka

- **24.1** Shirkadda Shaqosiinta Gaarka waa inay bixiso khidmad diiwaangelin u dhiganta **US $1,000** oo lagu bixiyo Shilin Soomaaliyeed.

## 25. Mudada Ruqsad

- Ruqsad Shirkadda Shaqosiinta Gaarka wuxuu shaqeynayaa hal (1) sano laga bilaabo taariikhda uu Xafiisku bixiyo.

## 26. Xaaladaha Keenaya Inaan Ruqsad La Bixin

**26.1** Ruqsad lama siin karo shirkadda Shaqosiinta gaarka ah kasta oo:

- Hore loogu ganaaxay ama loo hakiyay ruqsad.
- Ruqsadadeeda lagala noqday saddex jeer ama ka badan.
- Loo diiday ruqsad ama laga joojiyay sababo la xiriira cabashooyin aan la xallin oo la xiriira xuquuqda, ammaanka, sharafta, iyo badqabka shaqaalaha.
- Ku leh xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

# Qaybta Labaad
# Wajibaadka Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka

## 27. Mas'uuliyadaha Shirkadda Shaqosiinta Gaarka Waa In Uu:

shirkadda Shaqosiinta gaarka kastaa waa inay:

- Ku dhejiso nuqulka ruqsadeeda meel si cad uga dhex muuqata xafiiskeeda.
- Ku wargeliso Xafiiska 7 maalmood gudahood haddii ay isbedel ku yimaadaan maamulka sare ee shirkadda Shaqosiinta gaarka ee la xiriira shaqo qorista dibadda.
- Ku wargeliso Xafiiska isbeddel kasta oo ku yimaada maamulka guud iyo guddiga sare ee shirkadda Shaqosiinta gaarka muddo 10 maalmood gudahood.
- Ku wargeliso Xafiiska haddii ay rabto inay furato xafiisyo dheeraad ah.
- Ku wargeliso Xafiiska haddii ay isbedel ku sameyso cinwaanka rasmiga ah ee shirkada.

## 28. Dib-u-Cusboonaysiinta Ruqsad

**28.1** Ruqsad la bixiyay waxaa dib loo cusboonaysiin karaa sanad walba.

**28.2** Shirkadda Shaqosiinta gaarka kastaa waa inay gudbiso codsiga dib-u-cusboonaysiinta ruqsad **50 maalmood ka hor** intaanu dhicin ruqsada.

**28.3** Shirkadda Shaqosiinta gaarka kastaa waa in ay ku lifaaqdo codsigeeda dokumtiyada soo socda:

- Caddeynta lacag dhigista sida ku xusan habraacan.
- Warbixin xisaabeed oo la xaqiijiyay, lana socda shahaadada caddeynta canshuur-bixinta (Tax Clearance Certificate).
- Warqad caddeyn ah oo ka timid booliska, taasoo muujineysa in maamulaha shirkadda Shaqosiinta gaarka uu yahay qof aanay dacwad ka taagnayn.

- Warbixin guud oo loo diyaariyey qaab uu xafiiska bixiyey, taas oo faahfaahinaysa xaaladaha shaqaalaha horey loo meeleeyay gudaha Soomaaliya iyo dibadda, oo ay ku jiraan xaaladdooda nololeed iyo caafimaad.
- Xaaladda dhammaystirka dukumentiyada kale ee lagama maarmaanka ah, sida xafiiska tilmaamay.

**28.4** Haddii shirkadda Shaqosiinta gaarka aysan cusboonaysiin ruqsad wakhtiga loogu talogalay, waa inay dib uga codsato shati cusub iyada oo raacaysa habraacan.

## 29. Bixinta shahaadooyinka iyo dhiirigelinta ku habboon

Xafiiska waxa uu soo saari karaa tilmaamo iyo amarro lagu horumarinayo hirgelinta habraacan. Sannad kasta, Xafiisku waxa uu bixin doonaa shahaadooyin iyo dhiirrigelin si loo abaalmariyo shirkadda Shaqosiinta gaarka ah ee si gaar ah uga dhex muuqda bixinta adeegyada shaqo ee loo fidiyo shaqaalaha Soomaaliyeed iyo ajnabiga.

# Qaybta Saddexaad
# Hawlaha Shaqo Qorista Iyo Habraacyada

## 30. Xayeysiinta iyo Xaaladaha Shaqo Qorista

**30.1** Shirkadda Shaqosiinta gaarka kastaa waa in ay oggolaansho ka hesho Xafiiska ka hor inta aysan xayeysiin fursadaha shaqo ee ajaanibta ee Soomaaliya.

**30.2** Shirkadda Shaqosiinta gaarka ah waa in ay nuqul ka mid ah xayeysiinta shaqo u gudbiso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA)

**30.3** Marka ay xayeysiineyso shaqooyinka dibadda, shirkadda Shaqosiinta gaarka waa inay ku:

- Waa in la xayeysiiyo boosaska bannaan ee shaqo iyada oo loo marayo warbaahinta rasmiga ah ee Dawladda iyo warbaahinta gaarka loo leeyahay**.**
- Adeegsato idaacadaha iyo taleefishinada Dowladda.
- Adeegsato wargeysyada maalinlaha ah, telefishinada, iyo idaacadaha gaarka loo leeyahay.
- Adeegsato baraha bulshada kala duwan.
- Ku dhejiso bogagga internetka ee Wasaaradda iyo shirkadda Shaqosiinta gaarka .

**30.4** Xayeysiinta Boosaska Bannaan Waa Inay Si Cad U Qeexdo:

- Magaca buuxa, lambarka ruqsadda, iyo ciwaanka shirkadda Shaqosiinta gaarka ah.
- Magaca buuxa, ciwaanka xarunta shaqo-bixiyaha, iyo lambarka diiwaangelinta sharciyeed ee loo-shaqeeyaha.
- Tirada shaqaalaha la raadinayo, jagada, iyo xirfadaha loo baahan yahay.
- Shuruudaha la xiriira boosaska bannaan.
- Taariikhda bilowga shaqada iyo muddada heshiiska.

**30.5** Mudada Lagu Daabacayo Xayeysiinta waa in lagu daabaco warbaahinta ugu yaraan toban (10) maalmood oo isku xigta.

**30.6** Shuruudaha ku xiraan shirkadaha shaqosiinta gudaha Soomaaliya ee ku xusan (32.1 ilaa 32.5) ma khuseeyaan shaqo-qorista shaqaalaha Soomaaliyeed ee ka shaqeynaya gudaha Soomaaliya.

## 31. Habraaca Qorista Shaqaalaha Dibadda

**31.1** Shaqaalaha shirkadaha shaqosiinta gaarka ah waa inay magacaawdaa shaqaale leh aqoon, waayo-aragnimo, xirfad, iyo karti si ay u doortaan shaqaale leh xirfadihii iyo aqoontii loo baahanyahay.

**31.2** Imtixaanka Shirkadaha shaqosiinta lagu xulayo shaqaalaha waxaa lagu qaban karaa xarunta dhexe ee shirkadaha Shaqosiinta gaarka ama goob kale oo la isla oggolaaday.

**31.3** shirkadaha Shaqosiinta gaarka ama wakiil rasmi ah oo u metelaya waa inuu joogaa goobta imtixaanka.

**31.4** Hubinta Dukumentiyada Shaqo-doonayaash dhammaan dukumentiyada shaqo-doonayaasha waa in loo keenaa goobta shaqo-qorista, si ay u xaqiijiyaan shaqaalaha shirkadaha shaqosiinta gaarka ah .

**31.5** Shirkadaha shaqosiinta gaarka waa inay xaqiijiso nabadgelyada goobta imtixaanka, haddii loo baahdana waa inay la kaashato ciidamada amniga.

## 32. Ansixinta Heshiisyada Shaqada

**32.1** Hubinta U-hoggaansanaanta Heshiiska Shaqada

Xukuumaddu waa inay hubiso in qaabka Heshiiska Shaqada uu waafaqsan yahay habraacan iyo shuruucda shaqada ee Qaranka.

**32.2** Ansixinta Heshiiska Shaqada

Qaabka heshiiska shaqada waa in si rasmi ah u ansixiyaan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**32.3** Saxiixa loo-shaqeeyaha iyo dukumentiyada lifaaqan waa in uu xaqiijiyaa Ku-qeybsanaha Shaqada (Labour Attaché) / Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama sida ku cad Heshiiska Laba Geesoodka ah (BLA), haddii uu jiro.

## 33. Diyaarinta Safarka Shaqaalaha iyo Macluumaadkooda

**33.1** Marka Heshiiska Shaqada la xaqiijiyo, shirkadda shaqosiinta gaarka ah waa in ay diyaariso dukumentiyada safarka iyo habka shaqo-qorista shaqaalaha muddada loogu talogalay gudaheed.

**33.2** Shirkadda Shaqosiinta gaarka waa in ay shaqaalaha shaqo loo helay ka diiwaangeliso Safaaradda Soomaaliya ee dalka uu shaqaalaha u socdo shan iyo toban (15) maalmood gudahood.

**33.3.** Shirkad Shaqosiin gaarka kasta oo diraysa shaqaale Soomaaliyeed dibadda waa in ay hubisaa in shaqaalahaasi haystaan ruqsadda shaqada iyo oggolaanshaha deganaanshaha, sida ay dhigayaan sharciga qaranka ee dalka loo shaqo tegayo.

**33.4** Shirkadda shaqosiinta gaarka kasta waa in ay u gudbisaa Xafiiska warbixin dhameystiran oo la xiriirta heerka iyo xaaladda shaqo-qorista, iyadoo loo raacayo inta jeer ee ay go'aamisay xafiiska u.

**33.5** Shirkadda kasta oo shaqosiinta gaarka ah waa inay xafiiska siisaa warbixin dhamaystiran oo ku saabsan xaaladda howlaha, iyadoo la raacayo inta jeer ee ay Xafiiska go'aamiyey.

# 5

# Xadgudubyada Iyo Cabashooyinka

## Qeybta Koowaad
## Xadgudubyada ay Galaan Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah iyo Tallaabooyinka Laga Qaadayo

### 34. Xadgudubyada Sababi Kara Hakinta ama La-laabashada Ruqsadda Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah

Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah waxay wajihi karaan hakinta ama la-laabashada ruqsaddooda haddii ay galaan mid ka mid ah xadgudubyada soo socda:

**a.** Carqaladeynta ama faragelinta Kormeerayaasha Shaqada ee loo xil saaray Wasaaradda ama Xafiiska.

**b.** Ku guuldaraysiga in la ogeysiiyo Wasaaradda isbeddelada ku yimaada maamulka sare gudaheeda shan (5) maalmood oo shaqo gudaheed.

**c.** Shirkadaha Shaqosiinta shaqaale aan lahayn shahaadooyin, heerar aqoon iyo karti, ama shahaadooyin xirfadeed oo ka yimid hay'ad ay Wasaaraddu aqoonsan tahay.

**d.** Saameynta ama qasbida loo-shaqeeyayaasha inay shaqaaleeyaan shaqaale aan ka diiwaangashaneyn shirkadaha Shaqosiinta gaarka

**e.** Ku guuldaraysiga in la saxo xadgudubyadii hore ee la xiriiray shaqaalaha, sida xuquuqda shaqaalaha, badbaadada, iyo sharafta.

**f.** Ku guuldaraysiga in la diyaariyo shaqaalaha shaqooyinka dibadda gudaheeda waqtiga la cayimay iyada oo aan jirin sabab macquul ah.

**g.** Ku xadgudbidda amarada, ogeysiisyada, ama habraacyada u faraayo Xafiiska

**h.** Ku guuldaraysiga in la soo gudbiyo warbixinada la xiriira diyaarinta iyo meeleynta shaqaalaha si waafaqsan waqtiga loogu talagalay Xafiiska.

**i.** Ku guuldaraysiga in la soo gudbiyo liisaska shaqaalaha heshiisyadoodu dhammaadeen iyo warbixinada kale ee Wasaaradda codsatay.

**j.** Ku guuldaraysiga in si muuqata loo soo bandhigo nuqulka ruqsadda dhammaan xafiisyada.

**k.** Ku guuldaraysiga in la bixiyo adeegyo habboon, oo ay ku jiraan kuwa lagu xusay habraacan.

**l.** Dib u dhigista ama haynta mushaharka shaqaalaha ama lacagaha ay shaqaaluhu u soo diraan magaca shirkadaha Shaqosiinta gaarka.

**m.** Ku soo rogidda shaqaalaha socdaalka ah ee khidmadaha adeegyada shaqo-qorista.

**n.** Ku guuldaraysiga in la bixiyo tababarka iyo hagida kahor safarka (pre-departure orientation training) ee shaqaalaha.

**o.** Aan u hoggaansamin qodobka a 35 ee habraacan iyo bixinta adeegyada guud.

**p.** Ku guuldaraysiga baaritaanka iyo soo gudbinta warbixin ku saabsan dhaawacyada culus ama dhimashada shaqaalaha ee loo gudbinayo Xafiiska

## 35. Noocyada Ficillada Sharci-darrada ah iyo Khaladaadka Sababi Kara Burinta iyo La-laabashada Ruqsadda

Khaladaadka iyo ficillada sharci-darrada ah ee soo socda waxay keeni karaan burinta iyo la-laabashada ruqsadda Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ah :

**a.** Ka-qaybgalka tooska ama dadban ee milkiilaha, maamulaha guud, ama shaqaalaha howlaha shirkad kale oo ruqsad haysata.

**b.** Ku guuldaraysiga dib u cusboonaysiinta ruqsadda muddada lagu xusay qodobka 30.2 ee habraacan.

**c.** Shaqaaleysiinta ama fududeynta Shaqosiinta shakhsiyaad ka yar 18 sano si ay dibadda uga shaqeeyaan.

**d.** Haynta ama dib u cusboonaysiinta ruqsad iyadoo la adeegsanayo dukumentiyo been abuur ah.

**e.** Shaqosiinta ama dirista shaqaale dalalka uu mamnuucay Xafiiska ama Wasaaradda Arrimaha Dibadda (MFA).

**f.** Shaqosiinta ama dirista shaqaale si ay ugu shaqeeyaan xaalado wax u dhimaya caafimaadkooda, sharafkooda, ama sumcadda dalka.

**g.** Wareejinta ama beddelidda lahaanshaha ruqsadda iyada oo aan ogeysiis hore la siin Xafiiska lana helin oggolaansho.

**h.** Aqbalidda lacag ama qaab kale lacag qaadasha oo laga qaado shaqaalaha si loo fududeeyo shaqaaleysiintooda.

**i.** Dirista shaqaale dibadda iyada oo aan la isticmaalin qaabka Heshiiska Shaqada ee Heerka Caadiga ah ee uu oggolaaday Xafiiska.

**j.** Dirista shaqaale meelo aan lagu xusin Heshiiska Shaqada.

**k.** U-qaybinta shaqaalaha loo-shaqeeyayaal aan lagu sheegin Heshiiska Shaqada.

**l.** Adeegsiga ama xayeysiinta adeegyo la xiriira diyaarinta ama dirista shaqaalaha dibadda iyada oo aan la haysan oggolaansho.

**m.** Qabashada ama dib u dhigidda dukumentiyada safarka iyo macluumaadka kale ee la xiriira shaqaalaha la geeyay.

**n.** Been abuurid ama wax-ka-beddelidda dukumentiyada safarka ee shaqaalaha la geeyay.

**o.** Qasab ku saarista shaqaalaha inay ka tanaasulaan xuquuqdooda iyo dheefahooda iyada oo loo marayo khiyaano, dafitaan, hanjabaad, ama cabsi gelin.

## 36. Tallaabooyinka Ku-meelgaarka ah iyo Heerarka

**36.1** Xafiisku waxa uu hakin doonaa ruqsadda shirkad shaqosiinta gaarka ah haddii ay ku guuldareysato inay bixiso jawaab macquul ah oo ku aaddan cabashooyin sugaya oo la xiriira xadgudubyada habraacan iyo hagayaashii guud ee ay soo saaray Xafiiska.

**36.2** Xafiisku wuxuu hakad gelin doonaa ama dib u dhigi doontaa dib u cusboonaysiinta ruqsadda shirkada ilaa laga helo jawaab dhamaystiran, iyadoo lagu saleynayo qodobadan:

**a.** Ku guuldaraysiga in laga jawaabo cabasho hore loo helay oo si rasmi ah loo ogaaday.

**b.** Howlaha socda oo keenaya xadgudubyo dheeraad ah ama ka faa'iidaysiga shaqaalaha la meeleyey, taasoo waxyeello u geysaneysa xiriirka caalamiga ah ama danaha qaranka.

**c.** Caddeymo sugan oo muujinaya xadgudubyo ka dhan ah habraacan iyo hagayaashii guud ee u soo saaray Xafiiska.

## 37. Tallaabooyinka Maamulka

**37.1** Haddii shirkad shaqosiinta gaarka ah ay gasho khaladaadka ku xusan qodobka 37aad 12-kii bilood gudaheeda ee la soo dhaafay, waxa ay dhalin karta sida :

**a.** Hakinta ruqsadda muddo saddex (3) bilood ah haddii ay tahay xadgudubkii ugu horreeyay.

**b.** Hakinta ruqsadda muddo lix (6) bilood ah haddii ay tahay xadgudubkii labaad.

**37.2** Ku xadgudubka mar saddexaad Qodobka 37 waxa uu keeni doonaa kala noqoshada iyo baabi'inta iyo burinta ruqsadda.

**37.3** Caqab kasta oo lagu soo rogo sida ku cad qodobka 39.1 iyo 39.2 waxaa laga qaadan karaa rafcaan loo gudbinayo Guddiga Kormeerka gudaheeda shan (5) maalmood oo shaqo gudahood.

## 38. Cawaaqibka Ka Dhasha Hakinta ama La-laabashada Ruqsadda

**38.1** Shirkadda shaqosiinta Gaarka ah ee ruqsaddeeda la hakiyay ama laga laabtay waa in ay si degdeg ah u joojiso dhammaan adeegyada shaqo-qorista.

**38.2** Shirkadda Shaqosiinta Gaarka waa in ay dib ugu soo celiso Xafiiska ruqsadda la hakiyay ama la laabtay shan (5) maalmood oo shaqo gudahood.

**38.3** joojinta ruqsadda waxaa si rasmi ah loogu dhawaaqi doonaa, iyadoo la adeegsanayo warbaahinta dawladda iyo midda gaarka loo leeyahay.

**38.4** Hakinta ama la-laabashada ruqsadda kama saarayso Shirkadda Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka waajibaadka sharciyeed, waana inay weli ka jawaabtaa su'aalaha sharci ee la xiriira xaaladda shaqaalaha ay horey u shaqaaleysiisay.

## 39. Diiwaangelinta Cabashooyinka

**39.1** Shaqaalaha kasta la kulma xadgudub sharci darro ah, tacaddiyo, ama falal kale oo anshax-xumo ah, ama wakiilkooda rasmiga ah, waxay xaq u leeyihiin in ay si af ah ama qoraal ah cabashadooda ugu gudbiyaan Xafiiska.Cabashadu waa in ay la xiriirtaa jebinta habraacan iyo shuruucda shaqada ee dalka.

**39.2** Haddii cabashada afka lagu soo gudbiyo, Xafiiska waxay sharxi doontaa habka loo gudbiyo cabasho qoraal ah.

**39.3** Markii cabashada la helo, Xafiiska waxa u dib u eegis ku samayn doontaa cabashada qoraalka ah iyo macluumaadka la xiriira. u waxay raaci doontaa nidaamka lagu xusay habraacan iyo Xeerka Shaqada ee ee khuseeya.

**39.4** Haddii xadgudub uu ka dhaco waddan shisheeye, Xafiisku waxa uu la kaashanaysa Safaaradda Soomaaliya, caawin doontaa shaqaalaha si dacwad sharci ah loogu furo maxkamadda shaqada ama tan madaniga ah ee dalkaas.Haddii uu jiro Heshiis Laba-geesood ah (BLA) oo u dhexeeya Soomaaliya iyo waddankaasi, dacwadda waxaa loo gudbin doonaa sida uu dhigayo heshiiskaas.

## 40. Nuxurka Cabashooyinka

Cabashooyinka waa in ay waafaqaan qodobka (41) ee habraacan, isla markaana ay ka koobnaadaan:

**a.** Magaca buuxa iyo ciwaanka qofka cabashada gudbinaya.

**b.** Magaca, ciwaanka, iyo lambarka ruqsadda Shirkadda shaqosiinta Gaarka ah ee lagu eedeeyay xadgudubk sameysay.

**c.** Magaca buuxa iyo ciwaanka loo-shaqeeyaha saxeexay Heshiiska Shaqada.

**d.** Nooca cabashada iyo sababta dhabta ah.

**e.** Dukumiintiyada dheeraadka ah ee la baahan karo

## 41. Dhegeysiga Cabashooyinka

**41.1** Xafiisku waxa furayaa gal-dacwo rasmi ah iyadoo raacaysa qodobka a (41) e habraacan si loo xaqiijiyo in cabashada si sax ah loo dhageysto loona baaro.

**41.2** Marka cabashada la helo, Xafiisku waxa uu ogeysiin rasmi ah u diri doontaa shirkadaha shaqaleysiinta gaarka lagu eedeeyay, waxaa lagu lifaaqi doonaa nuqul ka mid ah cabashada, iyadoo shirkadda Shaqosiinta gaarka

la siinayo toban (10) maalmood oo shaqo si ay uga jawaabto.

**41.3** Haddii shirkadaha Shaqosiinta gaarka ay ku guul darreysato inay u hoggaansanto wicitaanka ama aysan bixin jawaab sida loo baahan yahay, Xafiisku waxa uu qaadayaa tallaabooyinka ku xusan habraacan

**41.4** Haddii qofka cabashada gudbiyay uu go'aansado in uu ka laabto cabashada afar iyo tobon maalmood gudahood (14), waa in uu warqad qoraal ah u gudbiyo Xafiiska, isagoo caddeynaya sababta uu uga laabtay.

**41.5** Xafiisku waxa uu diiwaangelin doontaa dib u laabashada cabashada, iyadoo dukumentiyada dhameystiran lagu keydin doono galka guud ee xafiiska.

## 42. Fulinta Go'aannada

Xafiisku waxa uu soo saari doontaa amar fulineed oo ku waajibinaya Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ah in ay u hoggaansanto go'aanka lagu gaaray habraacan iyo shuruudaha adeegyada guud.

**42.1** Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ah waa in ay u hoggaansanto amarada iyo go'aannada Xafiiska afar iyo tobon maalmood gudaheeda (14).

# 6

# Adeegyada khuseeya

## Qaybta Koowaad
## Damaanad Lacageed iyo Caymiska Shaqaalaha

### 43. Damaanad Lacageed

**43.1** Shirkad Shaqosiin Gaar kasta oo ku shaqo leh shaqo qorista dibadda waa inay dhigto **$25,000 USD** ama lacag u dhiganta oo Shilin Soomaaliye, akoon xiran oo ku jira bangi Soomaaliyeed oo la aqoonsan yahay. Lacagtan waxay damaanad u tahay ilaalinta xuquuqda iyo badqabka shaqaalaha la shaqaaleysiiyay.

**43.2** Shirkadda Shaqosiinta gaarka kaliya u diiwaangashan shaqo qorista shaqaalaha Soomaaliyeed ee gudaha Soomaaliya waa laga dhaafay sida ku cad habraacan qodobk.

**43.3** Lacagta lagu shubay akoonka lama bixin karo iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin Xafiiska.

**43.4** Haddii Shirkadda Shaqosiinta Gaarka ay ku guuldarraysato in ay fuliso waajibaadkeeda, sida ku xusan Qaybta Saddexaad (51.3) ee habraacan, Xafiiska waxay amri doonaa in kharashaadka lagu bixiyo dib-u-celinta meydka shaqaalaha iyo alaabtiisa, iyada oo loo adeegsanayo lacagta damaanada ee shirkadda ka taala.

### 44. Caymiska Shaqaalaha

**44.1** Shirkadda Shaqosiinta Gaarka kastaa waxa ay masuul ka tahay inay hubiso, xaqiijiso in shaqaalaha loo diro dibadda ay haystaan caymis caafimaad, shil, nolol, iyo naafonimo.

**44.2** Shirkadda Shaqosiinta Gaarka kastaa waa in, marka la codsado iyo iyada oo aan dib loo dhigin, ay u soo gudbisaa xafiiska nuqul dhamaystiran oo ah Qandaraaska Shaqada iyo dukumeentiga siyaasadda caymiska shaqaalaha.

# Qaybta Labaad
# Gargaarka Shaqaalaha

## 45. Waajibaadyada

**45.1** Xafiiska iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa mas'uul ka ah kormeerka iyo ilaalinta xuquuqda, ammaanka, sharafta, iyo karaamada shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda ka shaqeeya.

**45.2** Shirkad Shaqosiin Gaar kastaa waa inay xaqiijiso in in loo-shaqeeyaha uu ixtiraamo oo u hoggaansamo Heshiiska Shaqada.

**45.3** Xafiiska , isaga oo gudanaysa waajibaadkeeda, waxa uu si joogto ah u xoojin doontaa taageerada la siiyo shaqaalaha ka shaqeeya waddamada dibadda si ay u xalliyaan cabashooyinkooda.

## 46. Qurba-joogta

**46.1** Xafiisku iyadoo kaashanaysa dhinacyada ay khusayso, waxay ku dadaali doonaa inay abuurto is-dhexgal xooggan oo dhexmara shaqaalaha Soomaaliyeed ee u shaqeeya dibadda, si waafaqsan siyaasadda Qurba-joogta Qaranka. Xafiiska ayaa bixin doona tafaasiil dheeri ah oo ku saabsan arrintan, iyadoo la eegayo muhiimada ay leedahay, iyadoo la raacayo habraacan iyo adeegyada guud.

## 47. Kormeerka Fasaxa Shaqaalaha

Shaqaalaha ay meeleeyeen shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah ee dalka dib ugu soo laabanaya fasax gaaban waa inay iska diiwaangeliyaan Safaaradda Soomaaliya ee waddanka ay ka shaqeynayaan kahor inta aysan safarka bixin

# Qaybta Saddexaad
# Xalinta Khilaafaadka iyo Soo Celinta Shaqaalaha

## 48. Xalinta Khilaafaadka u Dhexeeya Shaqaalaha iyo Loo-shaqeeyaha

Khilaafaadka ka dhex dhaca shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha waxaa lagu xallinayaa sida soo socota:

**48.1** Dhexdhexaadin: Shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha waxay raadsan karaan dhexdhexaadiye ay ku kalsoon yihiin si loo xalliyo khilaafka.

**48.2** Haddii dhexdhexaadintu fashilanto, waxa la raaci doonaa hanaanka xallinta khilaafaadka ee waddanka shaqada.

**48.3** Haddii nidaamka xallinta khilaafaadka ee waddanka loo shaqo tagay uu fashilmo, labada dhinac waxay u gudbin karaan dacwadooda maxkamadda waddankaas.

**48.4** Haddii aysan sharci ahaan mamnuuc ahayn, shaqaaluhu wuxuu raadsan karaa kaalmo ka timaada ururada shaqaalaha ee waddanka loo shaqo tagay.

**48.5** Xafiisku wuxuu, isaga oo u maraya Wakiilada Shaqaalaha ee safaaradaha Soomaaliya, dabagal ku samayn doonaa khilaafaadka shaqo ee ka dhex dhaca shaqaalaha Soomaaliyeed iyo loo-shaqeeyaha dibadda.

**48.6** Shirakd shaqosiin kastaa waa inay dadaal u gasho xallinta khilaafaadka shaqo ee u dhexeeya shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

## 49. Soo Celinta/ Dib-u-Celinta Shaqaalaha Dibadda

**49.1** Xaaladaha hoos ku xusan, Shirakad shaqosiin kasta waxay mas'uul ka tahay hubinta in loo-shaqeeyuhu gudanayo waajibaadka dib-u-celinta shaqaalaha iyo hantidooda shaqsiyeed, iyadoo la daboolayo dhammaan kharashaadka la xiriira, sida ku xusan heshiiska shaqada ee la saxiixay:

**a.** Dhammaadka muddada heshiiska shaqada.

**b.** Geerida shaqaalaha, oo ay ku jiraan:

- i) Shahaadada dhimashada.
- ii) Codsi rasmi ah oo ka yimid qoyska si loo celiyo maydka.
- iii) Oggolaanshaha qoyska ee in lagu aaso goobta uu qofku ku dhintay.

**c.** Haddii loo-shaqeeyuhu uusan sii rabin adeegga shaqaalaha ama uu si dhakhso ah u joojiyo heshiiska shaqada.

**d.** Dhaawac ama xanuun daran oo uu dhakhtar xaqiijiyay, kaasoo shaqaalaha ka hor istaagaya inuu sii shaqeeyo.

**49.2** Habraaca dib-u-celinta iyo nidaamyada la xiriira waa in la dhammaystiraa muddo toban (10) maalmood gudahood.

**49.3** Shirkad shaqosiin kasta oo ka shaqeysa shaqooyinka dibadda ee Soomaaliya waa inay:

**a.** Hubiso in shaqaalaha iyo alaabtooda shaqsiyeed la celiyo marka heshiiska shaqada dhammaado.

**b.** Dib u celiso maydka shaqaalaha iyo alaabtooda shaqsiyeed goob ay go'aamiyo xaffiska shaqada, iyada oo ay la socoto shahaadada dhimashada ee la xaqiijiyay, muddo shan iyo toban (15) maalmood gudahood.

**Dib-u-Celinta Geerida Shaqaalaha**

**49.4** Haddii shaqaaluhu dhinto, habraaca dib-u-celinta waa in la dhammaystiraa toban (10) maalmood gudahood laga bilaabo markii maydka ay fasaxaan hay'adaha sharciga ah.

- Haddii shaqaale dhinto, maydka iyo alaabtiisa shaqsiyeed waa in la celiyo goob ay go'aamiyey Xafiiska Shaqada, iyada oo la raacinayo shahaadada dhimashada ee la xaqiijiyay, muddo shan iyo toban (15) maalmood gudahood.

# Qaybta Afraad
# Xadgudubyada Loo Geysto Shaqaalaha iyo Tallaabooyinka Habboon

## 50. Sababaha Lagu Joojin Karo Heshiiska Shaqada

Xadgudubyada hoos ku xusan waa sababo sharci ah oo shaqaaluhu ku joojin karo heshiiska shaqo xilligiisa kahor, isagoo helaya magdhow buuxa, iyo in shirakadda Shaqosiinta gaar ay qaaddo tallaabooyin habboon oo ka dhan ah loo-shaqeeyaha, oo ay joojiso wada shaqaynta loo shaqeeyaha:

**50.1** Soo noqnoqda u hoggaansami la'aanta waajibaadka heshiiska shaqada si isdaba joog ah.

**50.2** Shirkadda inay ku guuldareysato gudashada waajibaadkeeda.

**50.3** In shaqaalaha laga xannibo ama u diidista shaqaalaha dukumeentiyadooda socdaalka/aqoonsiga sharciga ah.

**50.4** Dib u dhigidda ama ka joojinta mushaharka shaqaalaha iyo xuquuqaha kale.

**50.5** In loo-shaqeeyuhu ku guuldareysto wax ka qabashada dhaawacyada culus, arrimaha caafimaadka, ama dhimashada shaqaalaha.

**50.6** Dhaqanka wax u dhimaya sharafta, karaamada, iyo anshaxa shaqaalaha.

**50.7** Kula kacidda tacaddiyo jinsiyeed iyo noocyada kale ee tacaddiyada shaqaalaha.

**50.8** Ka qaybgalidda hawlo sharci-darro ah oo ka horimaanaya habraacan guud.

## 51. Cawaaqib Sharciyeed ee Ka Dhasha Go'aannada La Gaaray

Xafiiska Shaqada waxa uu baaritaan ku samayn doontaa cabashooyinka shaqaalaha, gaar ahaan kuwa ka dhan ah loo-shaqeeyeyaasha iyo Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah, waxaana ka dhalan kara tallaabooyinka soo socda:

**51.1** In loo-shaqeeyaha laga mamnuuco Shirkadda Shaqosiinta dadka ku sugan Soomaaliya, iyo Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka laga mamnuuco bixinta fursadaha shaqo ee gudaha Soomaaliya.

**51.2** In laga mamnuuco Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka iyo wakiilladeeda sare ka qeybgalka shaqooyinka dibadda ee Soomaaliya.

**51.3** In loo-shaqeeyaha ama wakiilka Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka laga xisaabtamo oo lagu qasbo inuu magdhaw siiyo shaqaalaha, iyadoo loo eegayo falalka sharci-darrada ah ee lagu caddeeyey qodobka (52) ee habraacan iyo adeegyada guud.

## 52. Anshax Xumada Shaqaalaha

Ficillada anshax xumada ah ee hoos ku qoran waa kuwa sababi kara in la qaado tallaabooyin ciqaabeed oo ku habboon:

**52.1** In shaqaaluhu u guuldareysto gudashada waajibaadkiisa shaqo ee ku xusan heshiiska shaqada.

**52.2** Inuu galo falal dambiyeed oo ciqaab ka mudan xeerarka Soomaaliya ama xeerarka waddanka martida loo yahay.

**52.3** Inuu muujiyo ixtiraam la'aan diinta, dhaqanka, ama caadooyinka Soomaaliya ama dalka martida u yahay.

**52.4** In la gudbiyo dukumentiyo been abuur ah inta lagu jiro habka shaqo raadinta.

**52.5** In si lama filaan ah loo joojiyo heshiiska shaqada, iyadoo aan la raacin shuruudaha ku xusan heshiiska.

## 53. Tallaabooyinka Anshaxeed ee Loo Qaadayo Shaqaalaha Shaqaalaha Dibadda

Iyadoo la raacayo habraaca guud ee shaqooyinka dibadda iyo xeerarka khuseeya, waxaa la qaadi karaa tallaabooyinka maamulka ee soo socda:

**53.1** Digniin qoraal ah loo galinaaya faylka shaqaalaha ee Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah marka xadgudubka ugu horreeya dhaco.

**53.2** Shaqaalaha Soomaaliyeed: Saddex (3) bilood oo hakad ah laga geliyo shaqooyinka dibadda marka uu dhaco xadgudubka labaad. Shaqaalaha ajnabiga ah: Digniin labaad oo qoraal ah oo lagu diiwaangeliyo faylkooda shaqo ee Shirkadaha Shaqosiinta gaarka ah.

**53.3** Shaqaalaha Soomaaliyeed: Lix (6) bilood oo hakad ah laga geliyo ka qeybgalka shaqooyinka dibadda marka xadgudubka saddexaad dhaco. Shaqaalaha ajnabiga ah: Joojinta heshiiska shaqada iyo dib u celin dalalkoodii.

**53.4** Haddii shaqaaluhu ka hor yimaado tallaabooyinka maamulka ee lagu xusay qodobbada (55.2, 55.3), wuxuu rafcaan ka qaadan karaa Xafiiksa shaqada iyo guddiga kormeerka.

# 7

# Qodobo Kala Duwan

## 54. Xalinta Khilaafaadka iyo Cabashooyinka Shaqaalaha

Xafiisku wuxuu sameyn doonaa xafiis si gaar ah uga shaqeeya xalinta cabashooyinka u dhexeeya shaqaalaha iyo shaqo-bixiyeyaasha, iyada oo la raacayo xeerarka shaqada ee labada waddan.

## 55. Muddada Khilaafaadka Shaqo

Dacwad kasta oo la xiriirta xuquuqda shaqo oo dhaaftay muddada sharciga ah ee saddex (3) sano, sida uu qabo sharciga shaqada ee Soomaaliya, waxaa loo aqoonsan doonaa mid aan ansax ahayn, laga bilaabo taariikhda xadgudubka ama ku xadgudubka dhacay.

Cabasho kasta oo la xiriirta xuquuq shaqaale oo dhaaftay **3 sano**, sida ku cad Xeerka Shaqada Soomaaliyeed, waa la diidayaa.

## 56. Awoodda Soo Saaridda Xeer-nidaamiyeyaasha

**56.1.** Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada wuxuu soo saari karaa amarro iyo tilmaamo la xiriira hirgelinta habraacan.

## 57.Waajibaadka iyo Wada-shaqeynta

**57.1** Shirkad shaqosiinta gaar kasta iyo muwaadin kasta waxaa waajib ku ah inay taageeraan hirgelinta habraacan iyo Adeegyada Guud.

## 58. Waxyaabo la reebay (Mamnuucid)

**58.1** Ruqsada shaqosiinta dibadda ee hore loo bixiyay ka hor hirgelinta Habraacan iyo Adeegyada Guud waa waxba kama jiraan.

**58.2** Kaliya shirkadaha haysta ruqsad ayaa loo oggol yahay inay isku magacaabaan: “Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah loo Leeyahay oo *Ruqsad Haysata*”, “Hay’ad Shaqosiinta Gaarka loo Leeyahay” ama “Hay’ad Shaqo-siint.”

**58.3** Shirkadda Shaqosiinta Gaarka looma oggola inay isticmaasho ama ka faa’iidaysato adeegyada “dallaaliin” madaxbannaan (brokers). Adeegsiga adeegyada noocaas ah waxa loo aqoonsanayaa jebin culus (serious breach) oo ka dhan ah shuruudaha ruqsad-haysashada, kuna keeni karta tallaabooyin waafaqsan xeerkan.

**58.4** Shirkada Shaqosiinta Gaarka waxay shaqaaleysiin kartaa shaqaale aqoon leh si ay u matalaan heer deegaan. Si kastaba ha ahaatee, Shirkada Shaqosiinta Gaarka ayaa mas’uul ka noqon doonta habdhaqankooda la xiriira shaqada.